Isbitaalka QEII
BAARKINNADA BAABUURTA LA DHIGTO

Baarkinnada baabuurta la dhigto ee dabaqyada badan leh P1 ee cusub ee Isbitaalka QEII Waxaa la furayaa Talaadada, 3-da bisha Nofeembar 2026

Baarkinno badan oo ammaan ah, isla markaasna la heli karo haddii loo baadho ayuu yeelan doonaa Isbitaalka QEII.

Baarkinnadeena baabuurta la dhigto ee dabaqyada badan leh P1 waxaa la furi doonaa **Talaadada, 3-da bisha Nofeembar 2026**.

Baarkinnada baabuurta la dhigto ee P1 waxay yeelan doontaa in ka badan 1,000 meelood oo baarkinada baabuurta la dhigto ah, kuwaas oo ay maalin kasta isticmaali karaan bukaannada, dadka booqashada u imaanaya iyo shaqaalahaba.

Marka P1 la furo, baarkinnada P2 ee ku yaal Middle Street ayaa xirmi doona sababo la xiriira shaqooyin dhisme.

Waxaan kaaga mahadcelinaynaa dulqaadkaaga inta aan wadno howlaha aan ku balaarinayno Isbitaalka QEII.

Kharashka baarkinka iyo qiimo-dhimista

Wax lacag ah lagaama qaadi doono hadii aad hadii aad baabuur dhigato baarkinnada QEII ilaa biloowga sanadka 2027.

Lacagaha baarkinka iyo qiimo-dhimista, oo ay ku jiraan inta laga qaado shaqaalaha, ayaa la bilaabi doonaa in la qaado laga bilaabo horraanta sanadka 2027-ka. Waxaan bixin doonnaa ogeysiis hore ka hor inta aysan bilaaban lacag-qaadista baarkinka.

Macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan lacagaha baarkinka iyo qiimo-dhimisyada waxaad heli doontaa bilaha soo socda.

Lacagaha la qaado waxay naga caawinayaan kharashyada ku baxaya dhismaha, hawlgelinta, dayactirka, iyo hagaajinta baarkinnada baabuurta la dhigto, mana aha lacago loogu talagalay in faa'iido laga sameeyo.

Qiimo-dhimis ayaa jiri doonta si loo helo baarkinno qiimo jaban kuwaas oo loogu talagalay bukaanada iyo daryeelayaasha u qalma.

Qiimo-dhimis iyo xulasho ah lacago hal mar lawada bixinayo sanadkii ayay heli karaan shaqaalaha

Fulinta mashruucan waxaan uga mahad celinaynaa Dowladda Queensland.

Fadlan booqo **metrosouth.health.qld.gov.au/qeii/parking**



Xaqiiqooyin kooban

- ✓ In ka badan 1000 baarkinno oo baabuurta la dhigto oo korka ka dadan
- ✓ Astaamaha amniga oo ay ku jiraan nalalka, CCTV iyo digniinaha cadaadiska (duress alarms) oo dabaq kasta loo samaynayo
- ✓ Qalab ay ka mid yihiin baalayaasha cadceedda iyo haanta biyaha
- ✓ Adeegyada loogu talagalay dhammaadka safarka ee hababka gaadiidka, oo ay ku jiraan meelaha baaskiillada, goobaha lagu qubeysto iyo kabadhada alaabta lagu xareysto

DELIVERING FOR QUEENSLAND | Queensland Government

Metro South Health

QEII Jubilee Hospital

360 Troughton Road (corner Kessels Road),
Coopers Plains QLD 4108



Meesha dadka lagu dejiyo

Qeylo-dhaanta marka aad gurmad u wacaneyso (Duress alarm)

Baarkinnada cuuryaamiinta

Busteejada baska laga raaco

Meesha baskiilada la dhigto

Baarkin baabuurta la dhigto

B1 Building 1

B2 Clinical Services Building

B3 Allied Health and Ambulatory Care Services

B4 Building 4

Lagama geli karo

Midig lama aadi karo

Meesha ay dadka ka galaan

Queensland Government